

Partnership: Maxaa Xigga?

(Partnership: What's Next?)



Waxaad go'aansatay inaad iska diiwaangelisid Partnership. Sadex maalmood gudahood kadib taariiqda diiwaangelintaada, managed care organization (ururka daryeelkaaga la maareeyay MCO) ayaa kula soo xiriirayo. Waxay kaala shaqeynayaan qorsheynta booqasho gurigaaga ah.

Sharaxaado muhiim ah

Keyga MCO:

Lambarka taleefanka
kayga ee MCO's:

Taariiqda
diiwaangelinteyda:

Waxa la filayo inta lagu jiro booqashada guriga

Inta lagu jiro booqashada (iyo booqashooyin walboo mustaqbalka ah), shaqaalaha MCO ayaa ku baranayo. Waxay ku weydiinayaan su'aalo. Tusaale ahaan, daawoooyinkee aan laguu qorin ama saedadka badanaa aad iibsato? Waxa aad caawin uga baahantahay? Jawaabahaaga ku aadan su'aalahaan waxay ka caawinbeysaa inay wax ka ogaadaan baahiyahaaga iyo sida barnaamijka u taageeri karo baahiyahaas.

Waxaad yeelan kartaa qoys iyo saaxibo ka qeyb noqonayo booqashada gurigaaga, sidoo kale sida booqashooyin walboo mustaqbalka ah.

Booqashada gurigaaga kadib, waxaad:

- La abuurayaan qorsho daryeel kooxda daryeelkaaga.
- Ka dooro bixiyeyaasha shabakad.
- Heleysaa adeegyo iyo taageero.



Xasuusiyayaasha waxtar leh

- **Waa inaad lahaataa waaya aragnimada fiican ee Partnership.** Ha ogaadeen kooxda daryeelkaaga haddii aadan ku faraxsaneyn adeegyadaada ama daryeelka.
- **Partnership wa barnaamij iqtiyaar ah.** Waa iqtiyaarkaaga inaad iska diiwaangelisid. Waad dooran kartaa inaad ka tagtid barnaamijka xili walba. Haddii aad rabtid inaad ka hadashid iqtiyaarada kale, la soo xiriir ADRC-gaaga (aging and disability resource center) (xarunta illaha gabowga iyo naafonimada) ama Tribal ADRS (aging and disability resource specialist) (taqasuska illaha gabowga iyo naafonimada).

(Ku sii soco bogga 2)



WISCONSIN DEPARTMENT
of HEALTH SERVICES

- **Waxaad xaq u leedahay inaad xareysid racfaan ama cabasho.** Waad weydiin kartaa dadka inay dib u eegaan go'aan aad ku diidantahay. Tusaale ahaan, haddii adeegyadaada la yareeyo ama la diido, MCO-gaaga ayaa ku siinayo dokumenti loo yaqaan Notice of Adverse Benefit Determination (Ogeysiinta Go'aaminta faa'idada Xun). Waxay wax kaaga sheegaan xaquuqahaaga iyo sida loo xareeyo racfaan ama cabasho.
 - **Ombudsman (Baaraha) wuxuu kaa caawin karaa xareynta racfaan ama cabasho.** Ombudsman (Baaraha) waa u doode ama caawiye dhexdhaxaad ah. Adeegyadooda waa bilaash. Waxay wax kaaga sheegi karaan xaquuqahaaga iyo caawinta aad isuqu doodeysid.

Dadka 18-59 sanno iirka. Ia xiriir:

Disability Rights Wisconsin

Taleefon bilaash ah: 800-928-8778
TTY: 711

disabilityrightswi.org/

Dadka 60 sanno jirka iyo ka weyn, la xiriir:

Wisconsin Board on Aging and Long Term Care (Guddiga Gabowga iyo Darveelka Muddada Dheer)

Taleefon bilaash ah: 800-815-0015
TTY: 711

longtermcare.wi.gov

- **ADRC-gaaga ama Tribal ADRS ayaa halkaan u joogo inay ku caawiyaan.** Haddii aad su'aalo ama dhibaatooyin qabtid, la soo xiriir ADRC-gaaga deegaanka ama Tribal ADRS.

ADRC-ga Deegaankeyga ama Tribal ADRS:

Lambarka taleefonka ADRC ama Tribal ADRS:

Qoraalada:

